Walaalo is Waayey

Iyada oo Haajiri fikirkii ku dheeraatay maskaxdeeduna furfuri kari la'dahay farriimaha sidii tusbax la furay ugu soo fatahaya, ayey furtay albaabka qolkii Maxamed. Waa qol sida uu is ku gu dhexdaadsanyahay wax badan ka sheegayso duruufta guriga ka jirta, kii Faysal ee markii dhaweyd galayna uga sii daray. Dharka usgagga ah ee aad mooddo in qolka sharaxaadda looga dhigay, tuwaalka katabaanka sida foosha xun uga soo laadlaada, barkimada sariirta in ay ka dhacdo u dhow ee dhanka ka saaran, bustaha mar horeba isagu dhacay ee dhulka soo taabtay iyo kursiga aad mooddo in uu ku sujuudayo sijaayadda aan u jeedin jahadii loo tukanayey ayaa jawiga qolka iyo gurigaba wax badan ka sheegaysa. Maanta laakiin Haajiri ma eegayso qolkan mararka qaarkood ayna ogolaan jirin duqsi duulayaa in uu ku dego.

Haajiri waa hooyo lixdan jir ah. Da' iyo duruufo nololeed ayaa dusheeda ka muuqda. Daranyo iyo diihaal ayey la daalaa dhacaysaa. Nolol dhimashadu dhaanto ayey dhex mushaaxaysaa. Ilays beryo u daarnaan jiray ayaa ka damay. Han iyo himilo ay lahayd ayaa ka hallowday. Nolol tacab iyo tamar badan ay soo gelisay ayaa horteeda ku burburtay. Yididdiilo ay nolosha ka lahayd ayaa ka luntay. Dhibaatada haysata dhafoorkeeda ayey ku taallaa. Niyad jabka iyo qalbi xanuunka haysta oogadeeda sare ayaad ka akhrisanaysaa.

Iyadu ismay hagran, cid kalena waxba may yeelin. Ubad iyo adduun li'i midna ishaa umuu yeelin. Ammuuro iyo ibtilooyin ka awood weyn oo aan aadame hore u soo joogin ayaa iyada ku keliyeystay. Wakhtiga ayaa ka hiiliyey. Waayaha ayaa ciilay.

Waxay ahayd sannadkii 2011 kii markii qalalaasaha iyo qulqulatooyinku waddankeeda ka bilaabmeen. Dhallinyaro caaddifad iy cadho madax martay ayaa goor aan habeenna ahayn maalinna la gaadhin guddoonsaday in ay madaxweynahan macangegga ah kursiga madaxnimada weydaariyaan. Talo aan waayeel iyo wax garad midna lala wadaagin ayey ahayd. Dhallinta dabka hurinaysa laftoodu ismay weydiin waxa ka maqan ee ay raadsanayaan iyo waxan ay wadaan waxa ay ku waayi karaan. 'Laab la kacay lugo se kuma taagni' ayey ahayd arrintoodu. Dhallin aan silica iyo saymaha dagaal waxba uga soo joogin ayey ahaayeen. Dhallin caanaha nabadda laga

dhamo aan dhadhamin ayey ahaayeen. Maya, wey dhadhamiyeen laakiin waanay u dhadhamin, macaan iyo qadhaadh midna. Oo maxay u dhadhantaa ma iyagaa dhibba arkay? Ma iyagaa qori dhacaya iyo qof lasii jiidayo toona arkay. Ma iyagaa qof saani saacaddu uga buuxsantay oo socday mooyee qof saymo colaadeed middiyi ku sartay u soo joogay. Ma iyagaa qiiqa iyo qaaca ka baxa qummacyada rasaasta markay talo faro ka haaddo weligood u soo taagnaa. Ma iyagaan meelaha oogta dagaalku ka istaadhantahay marka ay shaahadaha muraayadaha kala socdaan u haysan humaag aan waxba ka hosayn. Barwaaqadu iskuma kaa sheegto beladuna digniin kuma sii siiso. Wanaagga aad haysato marka uu kaa maqanyahay ayuu macno sameeyaa.

Durbaba nabaddii ayaa galbatay. Jawigii naxariista iyo nayaayirka lahaa ayaa geddismay. Fiinta ayaa yeedhay. Codka diiggii wadaadka subixii daakiraadda xasuusin jiray, dayaanka dumbuqa ayaa dooriyey. Mushxaradda shimbirihii arooryada hore shururugleyn jiray, shalalamta xabbadda ayaa beddeshay. Sanqadha iyo sawaxanka noocyada kala duwan ee hubka ee la isku adeegsanayo ayaa samada ka yeedhay. Badhaadhihii iyo barwaaqadii lagu jiray ayaamo ayey ku baaba’day.

Maantu shalay maaha! Shalay nabad iyo nolol ayaa jirtay. Werwer iyo walbahaar lama qabin, wadnahana farta laguma hayn. Deganaansho iyo kala danbayn ayaa jirtay. Aroortii qof walba hawsha maalintaa ayuu dhiniciisa qaban jiray. Noloshu wey miisaannayd. Taagtaagga, turunturrooyinka iyo tarbiicooyinka maanta oo kale may lahayn.

Sida caadiga ah Haajiri afarta iyo badhka aroorimo ayey kacdaa. Waa waqti ku qaaliya. Weynaheeda ayey wax weyddiisataa. In saacad ku dhow ayey sacabbada biyihii weysada ee qaboobaa weli ka sii qoyan yihiin Rabbigeed hoos qabsataa. Noloshaa samaha iyo sareedada leh in Sarreeyuhu u sii siyaadsho ayey su’aalataa. Eedaanka subixii marka uu yeedho waxay ay toosisaa labadeeda wiil ka yar iyo yarta ay ayeyda u tahay. Salaadda marka sidaa foodda looga qaado, qof weliba meel ayuu qaabilaa. Maxamed oo ah labada wiil ee Haajira ka yar waa gaashaanle sare oo ka tirsan ciidanka qaranka ee Siiriya. Lixda subaxnimo waxa uu iska xaadiriyaa xero ciidan oo ku taalla waqooyiga Dimishiq. Faysal waa wiilka curad ee Haajira. Toddobada iyo

badhka waxa uu ku tagaa gaadhigiisa dugsiga uu maamulaha iyo mulkiilahaba ka yahay ee Caynu Shamsi. Caynu Shamsi, Faysal waxa uu aasaasay sagaal sano ka hor markii uu kulliyadda barashada shareecada Islaamka ee Dimishiq ka qalinjabiyey. Caynu Shamsi waa mid ka mid ah dugsiyada gaarka loo leeyahay kuwa ugu caansan loona jecel yahay. Hinda, xaaska Faysal, waa kalkaaliso caafimaad. Waxa ay ka shaqaysaa dhakhtar gaar loo leeyahay oo aan ka fogayn gurigooda. Haajira , Hadiya, curadda Faysal, Isra iyo Axmed ayaa guriga lagaga tagaa aroortii. Hadiyi inta badan ayeydeed Haajira kama ag dhammaato. Hadiyi waxa ay jeceshay sheekooyinka ay uga sheekayso ayeydeed. Haajirina waxa ay uga faa'iidaysataa in ay u dirato waxyaabaha ay guriga iyo debaddaba uga baahato. Wey isku nastaan.

Noloshaa dhammayska tirani hadda ma dhamma. Wey dheelliday. Waxbaa kala dhantaalay oo kala dhimay. Haajiri waa qof waayeelnimo iyo waayo aragnimo badani isku weheliyaan. Wax badan ayey u soo joogtay. Noloshu beri hore ayey iskugu toostay oo haddana ka kala daadatay. Macaan iyo qadhaadhba maalmuhu hore ayey u soo dhadhansiiyeen. Maalmo xasuustooda ay la muraaqooto wey soo qaadatay. Maalmo ay ka murugooto oo marka ay maskaxdeeda ku soo dhacaanba qalbiga meeli dalooshantana xaadir ayey u ahayd. Dhirbaaxooyin daran oo waqtigu ku dhuftay ayey ka soo doogatay. War badan ayey haysaa waayuhuna kuma cusba. Waxbaa intaaba u dheer laakiin. Wakhtigan maanta ay ku jirtaa wuxuu la yimid war cusub iyo wax aan hore u dhicin.

Markii dabayshu hurisay dogobyo aasnaa, markii baladu daartay dadkii iska degganaa ayaa wiil iyo walaalkii is waayeen. Dadkuba nabadda iyo naruurada ayey wax iskugu ahaayeen. Markii wax walba ay islahaayeen ayaa wax la'isku ahaa. Wanaagga iyo wacnaanta ayaa dadkaba isku haysay. Iyadaa ayaa nolosha qaabaynasay, qurxinaysay oo qiimaha u yeelaysay. Iyada ayaa dadkaba wax ka dhigaysay. Wax aanay ahayn. Balo hurudday ayaa toostay. Colaad huursanayd ayaa hamuum tiratay. Inan iyo aabbiihii kala geeya ayaa dhacday. Dhiigga waa lagu faraxashay. Dhaca maalka madaddaalo ayaa laga dhigtay. Maatida iyo birma geydada lagama baydhine birta ayaa laga aslay. Sidii loo kala xoogga iyo xirfaddaba badnaa ayaa la'isku muquuniyey. Nimay sigto iyo miday seeftu qaaddaaba, nimay sarto iyo

miday hilibka saaftaaba, saf kuyuu aakhiro ayaa la wada galay. Kii siifta seefta ka hoyday wuxuu noqday kii ay shalay la tagtay. Kii maanta sigtayna surrucaad hurdo kama seexan. Ducana wuxuu ku halaanhalay ‘nin sigtay ma nabad geline, Alloow xanuunkeedu muu maanta iga haado.’

Saymahaa iyo waqtigaa silloonaa ayey Haajiri reer Siiriya la wadaagtay. Midbaa jirtay laakiin. Mid iyada u gaar ahayd. Mid iyada ku saa’id ahayd. Mid aan lala wadaagin. Banbaaninta nafteeda ka sakow, Haajira waxa horyaallay hawl kale. Hawl dowladaha adduunku u maara waayeen ayaa ay iyadu maalinle u xallisaa. Waxay ay qaadatay door dhexdhexaadnimo; in ay dhex u ahaato labada garab ee hirdamaya; Madaxweyne Bashaar al Asad oo dhan ah iyo kuwa la dagaallamaya oo dhan ah. Door dhexdhexaadnimo oo caddaalad ah ayey qaadatay.

May, dhexdhexaad may noqon. Waxayba isku xilsaartay kala badbaadinta labada garab. Waa dhexdhexaadnimo iyo weliba dheeraad. Nabad dharaaro lagu nastay ayey ka dhex abuurtay. Laakiin taasi taloow siday u dhacday? Siday u kala horjoogi kartaa awoodaha hirdamaya iyada oo haween ah? Weliba hooyo ayniya ah? Sideedaba qof qudhihi qaran iyo qolo ka soo horjeedda ma kala qaban karaa? Hadda waa qof keli ah oo caadiya oo aan cidna dabada ku hayn. Qof aan dowlad iyo dal shisheeye toona dibadda ka soo taageerayn.

Inta badan maya. Maskax madax qudha ku jirtaa ma maarayn karto muran kursi galay. Waayo? Waayadeed! Haddii qofka kelidii taagani awoodi lahaa in uu dowladaha heshiisiiyo, dunidaba dil iyo dulmi toona kamuu dhaceene wey degganaan lahayd. Cidiba cid ma seegteena caadibaa loo wada noolaan lahaa. Gabbal kaa dhacaayiyo waagaa baryaayaa nabad lagu wadaagi lahaa.

Haddaba Haajira maxaad ka filaysaa? Ma in ay baddaa ka dabbaalato mise in ay dhex dhumbato? Ma in ay maaro keento mise in ay ku dhex milanto? Si toos ah uma dhexdhexaadiso dowladda iyo kuwa ka soo horjeeda. Cidda ay kala ilaalisaa waa labadeeda wiil. Maxamed iyo Faysal. Labadii ay adduunkaba ka eeganaysay ayaa colaaddani is tustay. Hadda waa labadii walaalaha ahaa. Walaalo dhab ah. Isku

hooyiyo aabbo, Haajiri wada dhashay. Walaalo is weeraraya naftana is weysiinaya oo aan haddana waalnayn!

Cimrigaa ay joogto iyo cirradaa ay leedahay dhacdadan oo kale umay soo joogin. Horteed jire u xaqiijiya may arag. Oday waayeel ahi war uu hayo maaha. Wadaaddadu kutubta kumay arag. Mahadhooyinku meelna kuma xusin. War dhagoodka kumay maqal. Dhiganayaasha laguma dhigin. Qalinka oo loo badinayo in uu ka daalay darteed, baalalka buugta laguma xardhin. Waa arrin ugub ah oo iyada ku kowsatay.

Maxamed waxa uu abbaanduule sare ka yahay ciidanka xerada labaad ee ugu weyn magaalada Dimishiq. Waxa uu hawl gelintooda u xilsaaranyahay ciidan kumannaan kor u dhaafay. Ciidankiisu waxa ay masuul ka yihiin sugidda ammaanka waaxda waqooyi ee caasimadda Dimishiq. Si gaar ah waxa ay u xilsaaranyihiin ilaalinta goobaha muhiimka ah iyo jidka isku xidha Dimishiq iyo Xumus. Jidhkaa soo ilaalintiisu qaabka dagaalka muhiim u yahay.

Faysal waxa uu hormood u yahay kooxaha dhallinyarada ah ee la hirdamaya ciidanka qaranka ee Siiriya. Kooxda uu Faysal gadhwadeenka u yahay waxa ay qaabilsantahay kicinta shacabka iyo ku dhiirigelinta dhallinyarada dagaalka ka dhanka ah madaxweyne Bashaar al Asad iyo dowladdiisa. Aqoonta diinta ee lagu tuhmayo darteed, Faysal waxa looga danbeeyaa qaabka dadka loogu qancinayo in loo midooba dagaalka dowladda iyo maamulka madaxweynaha in la ridaa in ay tahay xaq, kuna waajibtay qofkasta. Faysal isaga oo aqoontiisa iyo aftahannimadiisaba isku gaynaya waxa uu geed dheer u mid gaabanba u fuulay kicinta shacabka.

Hoygii ay ku noolaayeen Maxamed iyo Faysal waxa ku hadhay hadda Haajira, Hinda, Hadiya, Isra iyo Axmed yare. Haajiri habeenkii wewer ma seexato. Labadeeda wiil ee dagaalka iska soo horjeeda ku jira ayaa hiyi kac ku abuuray. Wadnaha ayey farta ku haysaa. War kasta oo soo dhacaana intaanu dhegeheeda ku soo dhicinba naxdin ayey lasii dhan qaarantaa. Marka loo dhammeeyo warka bilaa dhiillada ahna foostooyin naqas ah ayaa ka soo booda. Farxad yar oo ilbidhiqsiyo ka dib baabi’i doonta ayey dareentaa.

Maxamed caadiyan Jimcayaasha ayuu xaafadda ka soo war helaa. Saacado marka ay hooyadii is wareystaanna hawsha halkeedii ayuu kaga noqdaa. Faysal isaga lama arko. Hooyadiisii Haajira ee uu baarriga u ahaa, xaaskiisii Hinda ee uu boqorka u ahaa, inantiisii Hadiya ee uu jeclaa, Isra yartii aroortii marka uu sii baxayo kabaha u keeni jirtay iyo sabigii yaraa ee Axmed, hawl aan cidi u diran ayuu u kaga mashquulay. Hadhka ayuu uga dhacay. Si aan joogto ahayn ayuu xaafadda marmar uga soo dul dhacaa. Laakiin Faysal Faysalkii la yaqaannay maaha. Marka uu xaafadda yimaaddo cidna lama hadlo. Iska warrama iyo maxaad ku berideen toona isaga oo aan odhan ayuu hooyadii Haajira weyddiiyaa Maxamed in uu joogo iyo in kale. Mararka qaar markay ku tidhaaho “may” isaga oon gurigaba hore ugu sii socon uun buu albaabka ka noqdaa. Arrintaa hooyadii weli may fahmin. Marka uu weyddiinayo si aan naxariis ku jirin ayuu u yidhaahdaa “Maxamed muu joogaa?” Haajiri si dareen naxariiseed leh ayey u tidhaahdaa “hooyo shalay ayuu mar na soo gaadhay oo haddana wuu noqday, laakiin sida kale uu iska fiicnaa.” Wuu iska fiicnaa, wuu iska fiicnaa, mararka qaarkood inta uu madaxa ruxo ayuu ka daba yidhaahdaa isaga oo dibinta qaniinsan, qorigiisiina degta u sudhan yahay.

Waa la kala war la’yahay. Haajira waxay latahay in Faysal walaalkii Maxamed xaalkiisa iyo waxa uu ku suganyahay ka waraysanayo. Si aada ayeyba ugu faahfaahisaa. Maalmaha qaar ayey ku calaacashaa “waxan aad isla waa waayasaan taloow waa maxay?” Faysal ayey ku canaanataa “haddaan ogaan lahaa xilliga aad noo imanayso waan kuu sii ballamin lahaaba.” Marar badanna ballan ayuuba u qabtay Faysal hooyadii. Isaga oo war la’ aanta hooyadii ka faa’iidaysanaya ayuu ku yidhaahdaa “Jimcaha waan imanayaaye haddii uu iga soo horreeyo isii sugsii”. Jimce yaal dhowr ah ayey Haajiri ku tidhi Maxamed “hooyo Maxamed walaalkaa Faysal ayaa nagu kaa wareeriyaye bal yara sug wuu soo socdaaye.” Maxamed wuu ka war hayaa in aanu Faysal caadi ahayn. Sidii maalintii labaad markii uu kooxdiisa aan weli loo magac bixin u raacay, farriintii qoraalka ahayd ugu soo diray wuu ka digtoonyahay. Hooyadii laakiin arrintaa ma dareensiiyo. Marka ay la soo qaaddo ama ay maanta wuu imanayaaye yara sug tidhaahdo, waxa uu kaga baxaa “hooyo ma sugi kare e igu salaan uun.”

Dhanka kale, Faysal hawlihiisa darteed inta badan ma oofin jirin ballanta. Sidii looga bartay uun buu maalin aan la eegayn guriga ku soo beegmaa. Maxamed mee iyo ma joogo marka la’isla gaadhana halkiisii uun buu dib uga laabmaa.

Intii Maxamed iyo Faysal marba ay isa seegayeen, waqtigu cidna ma sugine wuu iska socday. Maalmo sannado u dhigma ayaa dhammaaday. Bilo bayhoof iyo balanbal badnaa ayaa idlaaday. Dadka intii aan qoryaha sidani wax qaxa iyo wax qudh baxa ayey u bateen. Hinda oo ahayd xaaskii Faysal iyo Hadiya yar hooyadeed, habeen aan sii fogayn ayey hoyatay. Bam guriga saq dhexe haleelay ayaa sababay. Haajira iyo Hadi

Baskan kala jiidan waligeedba may arag. Ma kala jiidna oo kaliya e korna wuu u dheeryahay. Quruxda ayuu wax walba kaga daray. Ashqaraar ayaa ku dilayaba marka aad aragto. Muuqaal maskaxdu wada sawiran karayso hal mar maaha muuqiisu. Baska muuqaalkiisa dibaddu waa caddaan balayax ah oo caleemo sureeri khafiif ah si habsami leh loogu qurxiyey. Laba laamood oo jirid qudha salka ku wada haya balse mid waliba markay dhexda maraysay dhan u fushay ayaa markay dalxiiskoodii soo dhammaysteen iyaga oo aan qaarkoodii dhexe dhaqaajin afka isa saaray. Sida ay sanka iskugu hayaan waxa aad mooddaa in mid waliba ta kale uga warramayso meeshii ay u foof tagtay. Badhtamaha, halka ay labada laamood u kala fogyihiin caaro ayaa xuub ku samaysatay. Shan dalool oo waaweyn ayaa badhtamaha xuubka ka muuqda. Birta dheer ee turuska baska ka taagan marada ka babanaysa isla xuubkii caarada iyo caleemihii isa soo xooday si ay is ku salaamaan uun baa ka maquuqda.

“Marxabban biki bisalaam yaa ummii al casiisa.” Ayey inan albaabka baska taagani ku tidhi Haajira oo saddexdii carruur ahaayee ilma Faysal daadahaynaysa. Inanta lafteeda muuqaalkeeda ayaaba ka daran kii baska. Da’ ahaan waxa ay u muuqataa 21 jir. Tima yar oo biliix ah oo ay hareeraha madaxa u kala rogtay ayey leedahay. Masar iyo wax madaxa lagu asturo mawadato kamana ag muuqdo haddii aad is odhan lahayd dabayshan dhacaysa ayaa ka tuurtay. Haaf yar oo boodhe ah oo labada jilib korkooda ku laalan ayey xidhantahay. Mijo dhuudhuuban oo aan wax xaad ah loo ogayn oo aad ku wii xidinxiitada mooddaana halkan ayey Haajira ka soo khaawisayaan. Xaashiyo cadcad oo dhowr is dul saaran ah oo wax aad caag madow mooddo sii dulsaaran ayey inantu kolba wax yar intay ku foorarsato ku qoraysaa. “Shukran bintii.” Intay ku tidhi ayey Haajiri hore u dhaaftay. Iyada oo aan muuqaalka baska gudiisa weli kawada bogan ayey kursigii ugu soo horreeyey dul hunbudhsatay carruutiina mid dhabta ku qabtay kuwii kalena kursi ku duwday.

Saddex saacadood oo safar aan kala go’ lahayna ka dib waxa ay soo gaadheen xero yar oo dad badani ku ururan yihiin. Dhammaan guryaha ka dhisani waa qaar isku eegeeg. Waa guryo aan dhagax iyo dhoobo midna ka samaysnayn. Waa guryo isku samays iyo sansaanba eg. Waa guryo haddii aan tirada wajahadda kaga taalla loo

samayn lahayn aanad kala garateen. Waa guryo kolba dabayshu dhanka ay ka qabato dari ku yeelanaya laakiin aan haddana dumayn.

“Ihbiduu, naxnu fii makaaninaa.” Ayey tidhi inantii yoo ay aad uga muuqataa in Carabigu ku adagyahay. Mar qudha ayey dadkii dhulka soo taabteen sidii iska rogo dhagax laga rogay. Dhowr hablood oo u eeg inantii baska ayaa dadkii qoloba dhan u hor kacay. Farxaddeeda Haajiri waxay aragtay Maxamed iyo Faysal oo iridda baska taagan oo gacmaha is haysta. “ Soo deg hooyo, maanta dagaal …”

“Toos, toos ayeeyo.” Waa Hadiya oo layaabtay waxa Isra yar helay. “Acuudu billaahi. Oo waa halkee halkani ayeeyo.” Waa Haajira oo hurdadii weli aan hagaag uga soo wada kicin. “Ayeeyo waad yara gama’day e balkaalay Isra eeg ma hadlaysaba e.” Intaa soon weli afkeeda ka soo wada dhammaan ayey Hadiyi u kacday dhankii qolka adeerkeed Maxamed ee Isra yar dhex jiiftay. Haajiri hadalkaa caadi umay wada maqlayn. Way wada maqlaysay laakiin may wada fahmayn waxa ay Hadiyi leedahay. Kalmadda ayeeyo ayuun bay caadi u garanaysaa in ay lahayd. Erayga ‘ayeeyo’ hore ayuu dhegaheeda uga batayoo maskaxdeedu meel fogba kama doonta. Muddo ilaa toddoba daqiiqo ah ayey isku dhex yaacsanayd. Adduunyadan ay joogto iyo tii ay inyar ka hor baska bilicda san leh u raacday ayey kala garan weyday midda dhabta ah. Siday kolba hareera u eegaysay ilaa oo ay daaleen muruqyada margigu may xaqiiqsan in dunidii ay hurdada ku dhistay dhalanteed ahayd, saddexdii eray ee u horreeyey ee afka Hadiya yar ka soo baxayna ku burburtay. Hore waxay u maqli jirtay ‘guri in la dhisaa ma dhib yara in la dumiyaana ma adka.’ Mid taa u eg laakiin inyar kaga duwan ayey immika aragtaa ‘ duni dhan oo calankeeda leh in hurdo lagu dhisaa ma adka hadal in lagu burburiyaana ka sii fudud.’

Ilaahay ballankii gurigu waa isagii. Korsiguna waa kii ay ku fadhiday uun. Gabbalkuna weli ma dhicine wuu yara gaabtay uun. Geedkii guriga ku horyaallayna muu guurine halkiisii uun buu is gamaarinayaa. Iyaduna adduun kale ma aadine halkeedii uun bay kanbadhuudhaa. Kuwii yaryaraana midda hadal daysay mooyee halkan bay orordayaan. Ciil iyo cadho weynaa. Waa iyadii. Iyadii iyada uun ahayd. Iyadii dhibta badnayd. Dunidii ay ku hawshootay ee kuwii ay dhashay ku hirdamayeen. Inta ay

qalbiga ka oyday ayey istidhi haddii Hadiyi aanay ku kiciseen adduunyadaadii cusbayd ee aan cidhiidhiga lahayn ayaad sii joogi lahayd. Haddana inta ay is badh qabtay ayey tidhi maxaad inanta yar ee aad ayeyda u tahay ku maagi ma marbay ahayd adduunyo lagu waarayo. Mid nafta uuni kuugu sheekaysay ayey ahayde. In yar intay dib u milicsatay adduunyadii daqiiqado ka hor ay dhex joogtay ayey tidhi Ilaahoow mid uun iiga rumee. Baskeedii bilicda samaa iyo inanteedii bilnaydba ha is kala tagtee Ilaahoow middaa uun iiga rumee. Maxamedkaa iyo Faysalkaa gacmaha is haysta. Walaalahaa aan sida maanta is malgayn ee meesha wada jooga. Kuwaa aan dowlad iyo dad ka soo horjeeda midna aan u kala adeegayn ee iyagu is ilaashanaya. Midhaa uun Allaaw iiga dhabee.

“Ee ayeeyo dee kaalay bal Isra eeg.” Waa Hadiya oo ku xiiqday ayeeyadan aan iyadaba maqlayn ee iyada uuni isku mashquulsan.
Haajira: “Iigu yeedh kalabadda xun. Ma caanihii ayey cabbi la’dahay.”
Hadiya: “Maya e bal kaalay eeg maba kacayso e.”
Haajira: “Ma kacaysa aa. Naa maxaad leedahay.”

Marka aad afaafka sidaa uga soo gasho qolka Maxamed, halka ay sijaayaddu taallo, meel sariirta hal tallaabo bari ka xigta, galafeedha casna in yar uun ka horraysa waxa jiifta Isra yar. Caadi uma jiifto. Laakiin jiifku waa tilmaanta ugu dhow ee tibaax lagaga bixin karo sida ay meesha u taallo. Kodhida madaxeeda ayaa si fiican dhulka ugu mudan. Dhabarka oo dhan labada garab dhexdooda ayaa isna si fiican dhulka u haysta. Qaarka danbe oo dhan labada miskood ayaa dhulka iyaguna si aada ugu dangiigsaday. Qaybaha kale ee jidhkeedu samada ayuu heehaabayaan. Haa, samada ayuu heehaabayaa. Labada gacmood iyaga oo aad mooddo madaafiic diyaaradda samada meel fog maraysa loo diyaar garaynayo ayey halkan cirka ku fiiqanyihiin. Aadbay bay u giigsanyihiin oo ku waasaa beri dhexda meel iskaga laabmi jiray maba odhanaysid. Faruhu iyaga oo sidii macne feedh oo kale duuban ayey hoos u fooraraan. Labada addin meel dhulka iyo cirka dhexdooda ah ayey fidsanyihiin. Mid la mida ama ka daranba gacmaha ayey iyaguna giijisanyihiin. Indhuhu iyagu sidii qof hurdo meel macaan u marayso ayey u dansanyihiin. Quraarad cadara oo oo laabta Isra ee sida fiican dhulka uga soo kacsan taalla mooyee wax kale ma agyaallo.

Haajira: “ Isra Isra, naa waan hoogay huunno inanta maxaa sidan u kala daadiyey. Ma habaar qabihii aabbaheed ahaa ee ay markii dhaweyd ka daba ooyeysay ayaa…”

Isri dhaqdhaqaaq malaha. Gacmaheeda iyo lugaheeda midna meesha uu yaallo kama soo dhaqaajin karaysid. Wax neefsasho ah iyo naqas ay qaadanaysaa ma jiro. Wadnuhu garaaciisii uu jidha ugu gargaari jiray waa horuu ka gaabsaday. Dheguhu maqal ma leh. Indhuhu arag ma leh. Afkuna wuu aamusanyahay.

Haajiri maaha qof ay ku cusubyihiin aragtida qof laga waayey astaamihii noolaanshaha. Laba wiil oo Maxamed iyo Faysal afrayn lahaa ayey hore u soo weyday. Ayaan iyo Amuul oo ay ayey u ahayd, Isra iyo Hadiyana u dhexeeyey ayey iyagana aaskoodii u soo taagnayd. Maantana waaba ayniyoo waaya aragnimo waqtiyeed ayey leedahay. Laakiin mid ayaa ka dhaadhici la’. Qaabka Isri noqotay iyo xilliga ay noqotay iyo waxa ku dhacayba maskaxdeeda ayey wareeriyeen. Si ay weyddiimaha maankeeda maansheeyey warcelin ugu hesho waxa ay qabsatay aleenka guriga si ay u garaacdo qaybta gargaarka degdegga ah ee dhakhtarkii ay Hindi ka hawl geli jirtay intii aanay hoyan ka hor.

Maxamed: “
daranba Faysal ka soo naaso cadyihiin. Waxa uu ka qoomammeeyey siro uu Faysal ka hayey oo aanu hooyadii afka uga furin. Waxa uu isku canaantay haddii xilli hore uu uga warrami lahaa hooyadii xogta uu Faysal ka hayo in maanta Isra yar adduunyada sii joogi lahayd. Caano daatay dabadood la qabaye, maanta waxa aad hayso waa in aad hooyadaa daboolka uga qaaddaa ayuu arrin ku soo gabogabeeyey.

Maxamed: “Hooyo haddii ay fooli timaaddo futo qarsiimo hadhaye, maanta waxa aan doonayaa in aan arrin aan beryahaaba kaa qarin jiray kuu sheego.”

Haajira: “ Bismillaahi raxmaaani raxiim. Bal ii wad Alle mid khayr qabta haka yeelee hooyo.”

Maxamed: “Hooyo waad ogtahay halka uu maanta xaafaddeenna xaal ka joogo. Waad ogtahay in aan saacadahaa aan toddabaadkii kaa soo war helaa ay igu adagyihiin isaga oo ciidankayga xeradiisu afar boqol oo tallaabo kuu jirto. Waad ogtahay amniga waddanka iyo arrimuhu siday yihiin. Waad ogtahay curadkaagii iyo walaalkay Faysal halka uu ka fadku diyey. Waxa aan maanta doonayaa inaan saddex arrimood kuu sheeg. Waa midda koowaade waxa aan doonayaa in aan kuu caddeeyo waxa uu walaalkay Faysal waxan innogu samaynayo. Waa midda labaade waxa aan doonayaa inaan kuu sheego cidda ka danbaysa dilkii Isra yar. Waa midda saddexaade waxa aan doonayaa in aan ciidanka ka soo goosto oo aan meel amniya ku geeyo oo aan aniga iyo walaalkayna ku kala nabad gelayno.”

Haajira: “Alle hooyo ha ii kaa daayo Maxamed-Hanadoowe bal hooyo taa inanta yar ii faahfaahi.”

fogaato ayaan doonayaa. Xero Qaramada Midoobay Xama agteeda ka sameeyeen ayaan rabaa in aan ku geeyo. Kuuma cayimi karo immika laakiin diyaar noqo.”

Safar baa loo xidhxidhay. Iyada Haajira wax badani kama qabyo aha. Maantaba haddii ay dhaqaaq is tidhaahdo wax gurigan milayga adduun ka soo maray dib ugu sii dhajiyaa ma majiro. Laakiin waxa la isku afgartay in ayaamo la nagaado. Waayo Maxamed in xerada ciidanka ee uu hoggaanka ka yahay ka soo goostaa wax sahlan maaha. Haajira yididdiilo ayaa gashay. Nolosha oo ay hore uga quusatay ayey dib u bilowday in ay qiimayso. Qaybo jidhkeeda ka mid ah oo qallalay ayaa dib u soo qoyaya. Ubax udgoon badan oo ayaamo markii uu roob iyo raysba waayey qaadhay ayaa did u soo baxaya. Caleemo curdin dhadhay oo casaaday ayaa dib u soo magoolay. Dhul uu ayax aroor dhaweyd amsaxa ka dhigay oo uu idleeyey ayaa bilaabay in uu dib u soo fiilo.

Saddex iyo toban saacadood iyo sagaal daqiiqo iyo soddon ilbidhiqsi ayuu Maxamed ku qiyaasay in ay ka hadhay saacaddii ay safarkooda bilaabi lahaayeen. Ballantu waxay tahay lixda subaxnimo marku uu kala wareejiyo labada ciidan, ciidanka habeenkii hawl galka dhammaystay iyo ciidanka aroorta hawsha ku jiraya, in uu si yar oo sibiq ah u soo siibto safarkana sidaa hooyadii iyo labada ilmood ee uu adeerka u yahay kul bilaabo. Haajira xaggeeda iyadu waa iska diyaar. Immika waxa ay u baxday si ay alaabo yar suuqa uga soo iibsato. Wey ogtahay in kollay tuulo yar la tagayo, markaa in xamaanta yaryar ee caasimadda uun laga helo in ay ka sii faro qabsataa waa garteed iyo garashadeed. Dal beddelashada iyo dareenka farxadeed marka laga tago, hal shay ayey Haajiri ka walaacsantahay. Markay dhowr tallaaba qaaddaba waxa ku soo dhacaya ‘billee afka goostii inkaarta qabay inta aad maqantahay gurigii kuu sii dhaafaa oo dhibaato kale gaystaa.’ Waa garteed Haajiri in ay ka fikirto in Faysal guriga iska yimaaddo. Waxay ogayd in sida wadku nafta aanu ula ballamin amminta uu ifka ka qaadayo in Faysalna guriga isaga soo galo isaga oo aan wax ogaysiis ah sii bixin.

Gurigu kii ay ka baxdayba maaha. Albaabka oo aanay kaga tagin guriga cid furta ayaa iska ballaqan. Tuug wax bililiqaysta oo guryaha baadhaana baryahaaba magaalada ma jirin. Booqasho iyo bariido cid uga timaadda xilli la filayo maaha oo waa

casar cadceeddu gaabatay oo godka liiqa dhigtay. Albaabkuna muu ahayn mid iskii ama aayar ku furmi kara e furaha hoose ayaa ku rognaa. Dabayl iyo duufaan albaabka jabisaana ma jirtee hawadu wey deggenayd.

“Ayeeyo aabbo ayaa yimidoo adiga ayuu ku doonayey oo markii uu ku waayey dibadda ayuu u baxay.” Waa Hadiya oo imaatinka aabbaheed ayeydeed farxad uga dhigaysa. Inkasta oo aanay weli ka quusin Haajiri inankeeda Faysal, inkasta oo dareenkii waalid nimo ay dareemayso, inkasta oo uu beerkeedii, kii iyada laga beeray iyo badh ka ka mid ah ba yahay, haddana marka ay magaca Faysal Haajiri maqashay meel ayaa damqanaysa. Nabar sii bugsanayey oo qolofaystay ayaa dib u qoonmaya. Qalbi dhaawacnaa laakiin dhaymo u socdeen ayaa dhalfiifaha noqonaya. Maqalkiisa ayaa nabar ay ka bogsatay dib u mililinayee araggiisuna toloow intuu yeeli lahaa? Alluun baa oge aadame ma suuraysan karo. Laba dareen oo is diidaya ayaa mar qudha ku soo wada degay. Dhan farxad ayaa ka gashay oo haddii aanay kol guriga ku soo gaadhine oo uu ka hor baxay waa u bushaaro iyo bilkhayr. Dhan kale werwer ayaa weli kaga furan.Waxay isleedahay taloow maanta halkee ayuu wax idiin dhigayo oo midkiin ku aakhiraysan doonaa. Waa male kaliya uune ilaa imika waxba uma muuqdaan.

Inta uu sidaa naftiisa ugu sheekeeyey ayuu dul dhigay kursigii wixii tibta la mooday. Sijaa